



Helping kids dream
with their eyes open.



Ardayda Dugsiyada dhexe ee Anwatin, Anne Sullivan Middle, Jefferson Middle, Northeast, Olson (6-8) iyo dugsiya dhexe ee Sanford waxaa lagu martiqaadayaa Mashruuca SUCCESS BWCA Canoe Adventure

Ayaynu nahay: Mashruuca SUCCESS waa hay'ad u taagan horumarinta caruurta taas oo ardayda la shaqaysa muddo todoba sano ah, laga bilaabo dugsiya dhexe ilaa dugsiya sare, si ay uga caawinto horumarinta xirfadaha la xiriira noloshu iyo hirgelinta waxyaabaha ay ku haminayaan. Iyada oo barnaamijkan lagu saleeyey kulamo horay loo qabtay, iyo barnaamij xagga masraxa ah, ardaydu waxa ay bartaan sidii ay u gaari lahaayeen go'aan xikmad ku dhisan iyo qorshe ku jeeda mustaqbalkooda.

Mashruuca SUCCESS waxa uu la shaqaynayaa ardayda dugsiyada Minneapolis tan iyo 1984kii sidoo kalana dugsiyada St. Paul tan iyo sanadkii 2002dii. Sanadkii 1998kii waxa aynu bilownay in ardayda dugsiyada dhexe aan u kaxayno inay tagaan biyo dhaca ku yaal xuduudda agagaarka Canoe. Booqoshadaas oo qaadata muddo todobaad ah waxa ay taageero u tahay barnaamijka taasoo ardayda ku dhiirigelisa in ay gaaraan hadafkooda, tababar ku qaataan isla markaana ka kasbadaan waayo aragnimo khibradna ka qaataan degaanka quruxda badan ee gobolka Minneapota.

Warbixin kooban oo ku saabsan biyo dhaca degaanka Canoe (BWCA): Safarkani waxa uu qaataa muddo todobaad ah. Maalinta ugu horeysa waxa aynu isu qaybinaa kooxo iyada oo koox kasta ay ka kooban tahay 7 arday oo ay wehliyaan 2 qof oo waaweyn. – Qof ka tirsan shaqaalaha mashruuca SUCCESS iyo qof takhasus gaar ah ku leh duurka loogu socdo oo hage ah. Inta lagu jiro todobaadkaas, ardaydu waxa ay bartaan isla markaana ay tababar ku qaataan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan safarkooda:

- soo bandhigidda dabeecadda iyo sida ugu nabadgelyo badan ee keynta loo maro.,
- wadista iyo qaadista doomaha yaryar ee biyaha dhexdooda si nabadgelyo ah oo aan dhib kaa soo gaarin,
- sida loo diyaarsado oo loo qaato cuntadii aad cuni lahayd muddo todobaad ah oo duurka lagu maqnaayo,
- rakibaadda iyo furfurista teendhooyinka,
- ururinta xaabada iyo samaynta dab la shito si mas'uuliyad ku jirto,
- karinta cuntada adiga oo adeegsanaya makiinadda cuntada lagu kariyo iyo xaabo,
- iyo akhrinta khariidada ee BWCA si aad ugu socon karto dhulka duurka ah ee kaymaha.

Ardaydu waxa ay maalin kasta ku qaadan doonaan iyaga oo doomaha yaryar ku wada harooyinka quruxda badan oo dhex jibaaxaya dhulka kaymaha ah, oo maalin walba raadinaya xero cusub oo ay degaan. Waqti fara badan waxa ay ku bixin doonaan sidii ay u samaynsan laahayeen saaxiibo, dabaasha, raadinta xayawaanka, qosol iyo farxad, barasho waxyaabo cusub, iyaga oo la heesaya waqtina la qaadanaya ardayda kale ee xerada kula jirta!

Waxaanu ku faraxsanahay in aanu mar kale aanu la shaqaynayno xerada lagu magacaabo Wilderness Canoe Base. Tani waxa ay noqonaysaa gu'gii 12aad ee aan xerada adeegsano Wilderness Canoe Base taasoo munaasib ku ah barnaamijka iyo hogayaasha wilderness. Dabeecad wanaagga “ka qaybgalayaasha” ayaa mashruuca SUCCESS u horseeday in ay arday fara badan ka qayb qaataan barnaamijka xuduudaha badaha ee Wilderness si ka badan sidii aanu filaynay! Hagayaashoodu waa kuwo aad u tababaran isla markaana leh waayo aragnimo balaaran wax kastana ka hor mariya nabadgelyada ardayda.

Sidee ayey u Shaqaysaa: Ardaydu waxa ay codsiyadooda ku saabsan ka qeyb galka barnaamijka **halka** todobaad ah ee safarka BWCA, iyaga oo dooranaya kan dhacaya Jun 13 - 19, 2012 ama Jun 22 - 28, 2012. Si aad uga qayb qaadata, ardayga iyo waalidkiis/mas'uulka ubadka waa in ay buuxiyaan oo celiyaan codsiga iyo waxyaabaha la socda.

Waxa aad codsiga ku heli kartaa mid ka mid ah dariiqoyinka hoos ku xusan:

- Soo wac mashruuca SUCCESS ee (612) 874-7710 oo codso in boostada lagugu soo diro gurigaaga codsiga iyo waxyaabaha kale ee la socda (ku dhaaf cinwaankaaga adiga oo ku dhaafaya # qolka aad degan tahay iyo nawaaxiga aad degan tahay (zip code).
- Kala soo bax codsiga boggayaga internetka ee http://www.projectsucceess.org/our_program/bwca_adventures/.
- Waxa kale oo codsiga aad ka heli kartaa xafiiska maamulka ee dugsiya aad dhigato.

Haddii aad doonayso in lagaa caaawiyo buuxinta codsiga fadlan soo wac (612) 874-7710.

Kharashka Safarka: Kharashka safarku waa \$400. Haddii ay qoysku awoodaan in ay bixin karaan lacagta oo dhan, taasoo aanu idinkaga mahad celinayno, si aanu u sii joogtayno in barnaamijka ay ka qayb qaataan arday badan oo qiime badan. Hase yeeshee, Mashruuca SUCCESS waxa uu doonayaa inuu xaqiijiyo in dhamaan barnaamijka ay ka qayb qaataan dhamaan ardayda doonaysa iyada oo aan loo eegin qiimaha. Deeq waxbarasho oo ku salaysan baahida ayaa la heli karaa taas oo ay suurto gal tahay in lagaa bixin karo \$50 - \$350 oo ah kharashka safarka (hadba inta kaa dhiman). Codsiga lagu codsanayo waxa uu la socdaa codsiga mashruuca.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan safarka, Fadlan la soo xiriir Mashruuca SUCCESS ee (612) 874-7710.